

Barnamij usameynta qaababka loo dhaqmo canuga qabo xanuunka la Yiraahdo (Autism/P.D.D). Waxaa xanuun maskaxeed oo qofka qabo Uu kaligiis is ku mashquulsan yahay uuna cidna la xirrireyn, la dhaqmeyn.

U sameynta hawlgallo iyo dhaqdhaqaaq:

1. *U diyaari canuga qalab iyo meelo ku haboon.*
2. *U jihee canuga si cad adigoo siinaya tusaalooyin muuqda (sida: adiga marka hore samee Waxa aad rabtid inuu sameeyo, tusaalee waxyaabo la taaban karo iyo sawiro.)*
3. *Si cad ugu sheeg waxa bilowgiisa iyo dhamaadkiisa. (isticmaal ereyo sida “dhammaaday”, ama “kulli waad sameysey” ama isu raaci dhameynta iyo waqtiga ood u sheegtid.*
4. *U diyaari hawlgallo ku haboon canuga adigoo ku saleeynaya heerka garashadiisa iyo Dulqaadkiisa/dulqaadkeeda. Kasii fikir inuu ku guuleysto hawgalkaasi ama sameeyo. Sida: sii canuga 5 gabal oo alwaax ama caag ah , ha siinin dambiil dhan oo gabalo alwaax ah. Markuu is dulsaarana, dheh waad dhameysay adigoo si aad ah u muusoonaya isla markaasina jooji hawlgalkaasi.*
5. *U diyaari canuga hawlgallo cusub uu ka helayo ama jecleysani karo. Sida : Haddii uu canuga jecelyahay baabuurta, isla markaasina aad u diyaarineysid halxiraale ama weydiimo, marka ku bilow halxiraale baabuur ku saabsan.*

M.T.A.C.L: Hawlaha caruurta intey yaryihiin